unhs 5-2007Somali:WAF.05.07 4/27/10 2:15 PM Page 1

Ilmo kasta ayaa u kobca qiyaas isaga ama iyada u gaar ah. Waa kuu muhiim adiga inaad u fiirsato hadalka iyo luqadda ilmahaaga oo codsato caawimaad haddii aad ka welwelsho.

6 illaa 10 bilood

- ★ Wuxu madaxa u jeediyaa dhinaca codka xiisaha leh
- ★ Wuxuu ku hadaaqaa (“ma-ma”, “ba-ba”, “da-da”)
- ★ Wuxu bilaabaa inu ku-deydo codadka hadalka
- ★ Wuxu fahmaa “maya,” “bay-bay,” iyo ereyda kale ee caadiga ah

10 illaa 15 bilood

- ★ Wuxu tilmaamaa ama eegaa waxyaabaha ama dadka uu yaqaano marka la weydiiyo inuu sidaas sameeyo
- ★ Wuxuu ku deydaa ereyda iyo codadka fudud
- ★ Wuu bood-boodaa ama u cod sameeya markuu muusik jiro
- ★ Wuxuu jecelyahay ciyaaraha ay ka midka yihiin “peek-a-boo” (wajiga oo la qariyo oo la tuso) iyo “pat-a-cake” (hees carruured)

15 illaa 18 bilood

- ★ Wuxuu raacaa tilmaamaha fudud, sida “i sii kubadda”
- ★ Wuxuu ka jawaabaa marka magaciisa lagaga dhawaaqo qol kale
- ★ Wuxuu ka dareen-celiyaa heesitaanka ama muusikada
- ★ Wuxuu fahmaa su’aalaha fudud ee jawaabtoodu tahay“haa-maya”
- ★ Uses 10-20 words
- ★ Markuu yahay 18 bilood, waa inuu yaqaano ereyo intaa ka badan

18 illaa 24 bilood

- ★ Wuxuu isticmaalaa 20 erey iyo wax ka badan
- ★ Wuxuu isku daraa 2 erey “juus badan” ama “rabaa buskud”
- ★ Wuxuu jecel yahay sheekooyinka iyo heesaha

24 illaa 36 bilood

- ★ Wuxuu isticmaalaa 30 erey iyo wax ka badan
- ★ Wuxuu isticmaalaa 2-3 weedho ah
- ★ Wuxuu inta ugu badan gudbin karaa baahidiisa

Xafiisyada Adeegayada Horay wax-uga-Qabshada
Barnaamijka Maqalka Ilmaha Dhasha ah
Taleefan (614)-644-8389
1-800-755-GROW
www.ohiohelpmegrow.org

Horey U-Garadka Ayaa Muhiim Ah

Laba barnaamij oo gobolka oo idil ka jira ayaad adiga iyo ilmahaagu ku heli kartaan lacag la’aan. Labada barnaamij ayaa loogu talagalay carruurta sabiga ah iyo carruurta markaa dhalata illaa da’da 3 sano.

1. Help Me Grow (Iga Caawi Koritaanka) (HMG) 1-800-755-GROW
2. Barnaamijka Maqalka Ilmaha Deegaanka (RIHP)

RIHP ayaa ku siin kara adeegyo guriga ku saleysan oo kaa caawin kara sidii aad ula xiriiri lahayd ilmahaaga. Waxa jira siyaabo badan oo ilmahaagu adiga u kugula xiriiri karo. Siyaabahan la kala dooran karo ayaa ka mid ah luqad calaamdeedka, qalabka maqalka, qalabka dhegta lagu rakibo ama kuwo isku jira oo kuwan ah iyo kuwo kale oo laga dooran karo. **Ku sii wad inaad la ciyaarto, la hadasho iyo inaad u heesto ilmahaaga.**

La xiriir ODH haddii aad qabto waxa su’aalo ah oo booqo bartayada internetka (hoosta ku qoran) Waxaan kaa caawin karnaa inaan deegaankaaga kaaga helno adeegyo.



Xafiisyada Adeegayada Horay wax-uga-Qabshada
Barnaamijka Maqalka Ilmaha Dhasha ah
246 N. High Street,
Columbus, OH 43215
Taleefan: (614)-644-8389
1-800-755-GROW
Faakis: (614) 728-9163
email: beis@odh.ohio.gov
www.ohiohelpmegrow.org

Loo-shaqeeye /Bixiye ah Bixiye Fursado Shaqo si Siman

Bilowga maqalka caafimaadka qaba …

Macluumaadka Waalidka

Baaritaanka Laga Siman Yahay ee Maqalka Ilmaha Dhasha ah (UNHS)

Sharciga dowladda gobolka ayaa faraya in DHAMMAAN carruurta dhasha ah la baaro maqalkooda kahor inteyna guriga la geyn. Baritaanka maqalku wuu sahlan yahay oo badbaado ayuu leeyahay.

Waaxda Caafimaadka Ohio

Baaritaanka Maqalka Ilmaha Dhasha ah

Baaritaanka Maqalka ayaa dariiq sahlan ah oo lagu ogaado haddii u ilmahaagu maqli karo, ama haddii uu u baahan yahay tijaabo dheeraad ah. Caruurta dhasha ah ayaa u isticmaala maqalkooda sidii ay horay ugu marin lahaayeen xirfadahooda hadal iyo maqal oo aadugu muhiim ah dad la xiriikooda.

1 Sidee baarintaanka maqalka loo sameeyaa?

★ Ilmahaaga ayaa seexan kara waqtigan tijaabada.
★ Baaritaanka ayaa lagu qabtaa qolka xannaanda am qol wax kastaa aammusan yihiin.
★ Baaritaanku waa degdeg (15 daqiiqo ama wax kayar).

Ilmahaaga ayaa qaadan doona mid ama labadaba tijaabooyinka hoosta ku qoran:

ABR: (Jawaabta Maskax-Hoosaadka Maqlitaan)
Saddex gabal (patches) aya la dul saari doonaa wajiga, garbka iyo goorta ilmaha. Qalabto maqal (headphones) ayaa dul saari doonaa dhagaha ilmaha oo ilmaha ayaa maqali doona maqallo fudud.

OAE: (Codad laga sii daayo gudaha dhagaha)
Xunbo ama caag afkiisa hore ayaa la galin doonaa dhagaha ilmaha oo ilmaha ayaa maqali doona maqallo fudud.

2 Natiijooyinka Baaritaanka Maqalka:

Natiijo Ka-Gudub Micnaheedu waa:
❮ **Ilmuhu wuxuu ka-gudbay maanta baaritaanka maqalka.**
★ Had iyo jeer u fiirso hadalka iyo luqadda tilmaamaya heerarka koritaanka ilmaha.

Ka-Gudub Wadata Arrin Halis Micnaheedu waa:
❮ **Ilmuhu wuxuu ka-gudbay baaritaanka maqalka maanta.**
★ Ilmahaaga ayaa leh hal ama wax ka badan oo ah arrimo halis ah, fadlan la hadal dhakhtarka ilmahaaga.
★ Tijaabitaan dheeraad ayaa laga yaabaa in loo baahdo; mararka qaarkood maqal lumitaanku wuxuu dhacaa mar dambe markay tahay nolosha.

Natiijada Ka-Gudub-la'aanta micnaheedu waa: Fiiri qaybta Baaritaanka Ku-Xigeenka ah
❮ **Ilmuhu kama gudbin baaritaanka maqalka maanta. Tijaabitaan dheeraad ah ayaa laga-maarmaan u ah ilmahaaga.**
★ Waxayaabah u uga baahan yahay maqalka ilmahagu ayuu eegi karaa dhakhtarka-maqalka ("audiologist" ama Xirfad-yaqanka maqalka).
★ Dareeraha ku jira dhagaha ama sababo kale ayaa laga yaabaa inay sabab u yihiin natiijadan
★ Tan micnaheedu ma aha in ilmahaagu leeyahay lumitaan maqal, laakiin inuu u bahaan yahay tijaabo buuxda.
★ Qabso ballanta tijaabada ku xigta gudaheeda laba-saddex usbuuc kadib markaa ka tagto isbitaalka ee aad gurigа tagto.
★ Isbitaalka ayaa ku siin doona liis ay ku qoran yihiin dhakhaatiirta maqalka (audiologists) oo tijaabo dheeraad ah ku samayn karta ilmahaaga.
★ Haka walaacin ama haka cabsan natiijadan.

3 Haddii ilmahaagu u baahan yahay tijaabo ku-xigta tii hore:

(ama natiijo ka gudbid-la'aan ama xaalad halis ah)

Tallaabooyinka Xiga:

(Hadafka: tijaabitaanka oo lagu dhammeeyo 3-6 bilood ama kahor)

1. Kala hadal dhakhtarka ilmahaaga arrimaha ku saabsan natiijooyinka baaritaanka marka ugu horreysa ee la baarayo.
2. Ballan ka qabso tijaabitaan ku xiga dhakhtarka maqalka (Xirfad-yaqaanka maqalka) gudahooda laba-saddex usbuuc dhalashada ilmahaaga. Isticmaal liiska ay ku siiyeen isbitaalku sidii aad u heli lahayd dhakhtarka maqalka (audiologist).
3. Barnaamijka Maqalka Ilmaha ee Deegaaneed ayaa kaa caawin kara sidii aad u heli lahayd dhakhtarka maqalka (audiologist) ama ay kaaga jawaabaan su'aalaha ku saabsan tijaabitaanka xiga.

4 Kadib Tijaabada xigta Ilmahaygu waxa ka lumay maqalkii, Markaa Maxaa Xiga?

(Hadafka oo ah 6 bilood ama kahor)

1. Dhakhtarka ama dhakhtarka maqalka ayaa kaala hadli doona arrimaha ku saabsan lumitaanka maqalka ee ilmahaaga.
2. Barnaamijka Maqalka Ilmaha Deegaanka (RIHP) ee agagaarahaaga ayaa kula soo xiriiri doona.
3. RIHP ayaa leh la-taliyeyaal waalid oo khibrada u leh inay kaaga jawaabaan su'aalahaaga, oo ku siiya macluumaadka ku saabsan maqal lumitaanka, syaabaha dad kula xiriika kale, inay u bixiyaan taageero iyo kheyraad qoyska.
4. Barnamiijka Help Me Grow-Birth to Three (Iga Caawi Koritaanka-Dhalashada illaa Saddex oo ah Barnaamij ah Horay wax-uga-qabsho) ayaa ku siin doona isku-duwe adeegga loogu talagalay qoyskaaga.
5. Ku sii wado inaad aragto dhakhtarkaaga maqalka.
6. ODH uga wac macluumaadka dheeraadka ah taleefanka **614-644-8389**, ama fadlan booqo bartayada internetka http://www.ohiohelpmegrow.org

Maqalka Waxa La tijaabin Karaa Da' Kasta!

Had iyo jeer u fiirso hadalka iyo luqadda tilmaamaya heerarka koritaanka ilmaha

Waxbarashadu waxay ka bilaabantaa waqitiga Dhalashada

★ Waqti Fiican la qaado ilmahaaga markuu isagu ama iyadu koreyso. La hadal, la hees, oo la ciyaar ilmahaaga.

Hadalka iyo Luqadda tilmaamesya heerarka koritaanka ilmaha

★ Inta ugu badan carruurta ka gudubta baaritaanka maqalka markay dhashaan ayaa baran kara luqadda iyo hadalka.

★ Carruurta qaarkood ee ka gudba baaritaanka maqalka ayaa nolosha dabyaaqadeeda waaya maqalka.

★ Aad ayey kuugu muhiim tahay inaad ilaaliso horumarka maqalka, hadalka iyo luqadda ilmahaaga.

★ <u>Waa muhiim inuu dhakhtarka maqalka (Xirfad-yaqaanka maqalka) ilmahaaga tijaabo ka qaado haddii aad wax welwel ah ka qabto maqalka ilmahaaga.</u>

Istcimaal jadwalka (chart) tilmaamaya heerarka koritaanka sidii ay kaaga caawiso u fiirsiga horumarka maqalka, hadalka iyo luqadda ilmahaaga.

Dhalasho illaa 3 bilood

★ Wuxuu ka naxaa codadka kor u qaadsan
★ Waxa dejiya codka u yaqaan

3 illaa 6 bilood

★ Wuxuu madaxa u jeediyaa si u raadiyo codka
★ Wuxuu isticmaalaa indhaha si uu u raadiyo codka
★ Waxa laga yaabaa inuu yeesho qeylyo, ooyo ama hadaaqo
★ Wuxuu ku deydaa codkiisa - "oohs", "ba-ba's"
★ Wuxuu jecleyahay sheyga qalalabta (rattles) iyo waxyaabaha kale ee codka sameeya

waxay ka sii soo socotaa bogga kale

Lumitaanka maqalka ama dago-beelka ayaa u horseedi kara soo-daah ku dhaca hadalka, luqadda ama wada xiriika ilmahaaga.